Ministry of Social Affairs and Employment

Qiimaha ugu mihiimsan ee isdhexgalka Holland

20 ka febraayo 2014

Ka Koobanjahay

Horudhac 3

Xorriyadda 6

Islasinnaanta 9

Daacadnimmadda iyo shaqada 11

Horudhaca

Buuggaan waxaad ka aqrinaysaa qiimaha saldhiga ay u leedahay isdhexgalka Nederland. Haddii aad aqrido waxaad si fiican u ogaaneysa sidii aan Nederland gudeheed iskula dhaqanno, iyo sababta aan siddan u yeelnay. Waxaa laga yaabaa in aad hore u taqaanay qiimeyntaan. Laakiin waxay kaloo noqon kartaa in bulshada reer Holland uu dhab ahaan yahay mid ka duwan kii dalka aad ka timi. Buugyarahani wuxuu ku sinayaa guudmar ku saabsan qiimaha ugu muhiimsan, xeerarka bulshada iyo xuquuqda Nederland. Aqoontaas waxay kaa caawinkartaa si aad ugu qeybqaadato bulshada.

Buugyarahani waxaad ka aqrinaysaa xoriyadda, ninnaanta iyo cadaaladda. Kuwani waa waxyaabo muiim u ah bulshadeena. Waa maxay qiimayaashan? Maxaad ka dareensantahay nololmaalmeedkaaga? Maxay bulshada reer Holland kaa sugeysaa? Iyo waxa kale ee aad ka filan karto bulshada?

Dimuqraadi

Nederland waa dal dimuquraadi ah. Dimoqraadiyaddu waxa ay shicibku awoodaan inay dhinacood ka go'aamiyaan maamulka dalka. Taas waxaa lagu sameeyaa doorashooyinka: qof kasta oo reer Holland oo 18 sano ama ka weyn waxay u codayn karaan doorashooyinka dadka isu caleema saaray doorashadda. Doorashooyinka waa bilaash iyo qarsoodi. Taas macnaheedu waxa weeye qof kasta oo coddeeyn karta, iyo in aad marnaba cidna u sheegin cida aad dooratay. Waayo guriga, Golaha Magaalada iyo doorashooyinka ismaamulka goboladdawaxaa la qabtaa afartii sanoba mar. Shan sano oo kasta waxaa la qabtaa doorashada baarlamaanka Yurub.

Muwaadinada ka socda Midowga Yurubta waxay ka codeyn karaan isla degmada ay ku nool yihiin, iyagoo u codeynayaan golaha magaalada. Sidoo kale, waxay u codayn karaan baarlamaanka Yurub.
Soo galootiga ka baxsan Midowga Yurub waxay ka codayn karaan oo kaliya golaha Deegaanka ee magaalada, haddii ay ku nool yihiin dalka Holland muddo shan sano ah. Kaliya dadka ajnebiga ee wadanka la qabsaday qaatayna dhalashada Hollandeeska, waxay u codayn karaan Qolka labaad iyo Golaha Gobolka, waxaa kaloo jira oo guud ahaan lagu shegay inay dadka xaq u leeyihiin codeynta iyo inayba noqon karaan ama loo dooran karo sidii xirfad wakiil gaar ah.

Xeer iyo dastuur

Nederland waa dowlad xeer iyo dastuur leh. Taas macnaheedu waxa weeye in qof kastaa leedahay xuquuq isku mid ah, oo qof walba uu tixgaliyaa sharciga. Dowladuna ay ilaalisaa xeerka. Hadii aadan ku raacsaneyn go'aan ay soo goysay dowlada, markaa waad ka dacwoonkartaa maba bilaabi kartaa kiis maxkamada ka dhanka tahay oo aad ku qaadeyso dowladda. Dawladdu waa in ay aqbalaan go'aanka ay maxkamadda soo saartay. Waxaa kale oo aad ku ku qaadi kartaa cabasho oo aad kala kaashanaysid xafiiska cabashada dowladda qaranka. Waxaa uu qaban karaa cilmi baaris dheeraad ah cabashada. Dastuurka waa aasaaska sharcigeena. Waxa uu sharxayaa xuquuqda iyo waajibaadka dawladda iyo muwaadiniinta. Xoriyadda, sinnaanta iyo kuwo aan u mihiim ah ee dastuurka ku qoran. Nederland ayaa sidoo kale saxiixay (tusaale ahaan Heshiiska Yurub ee Xuquuqda Aadanaha), kuwani waa cahdiyada xuquuqda aadanaha oo ah ku qoranyihiin

Xuquuqda bulshada

Nederland gudeheed waxaad masuul ka tahay hab- nololeedkaada. Laakiin haddi sabab kasta ha ahaatee aadan ku quulaysan awoodaada, iyo aysan jirin cid kaa caawiso, kadib ayaa dawladdu kaa caawinaysa. Tusaale ahaan, in uu bixiyo kirada.m cuntada iyo dharka . waxaa kale oo aad xaq u leedahay in ay daryeel caafimaad sida qof walba ee Nederland ku nool waa inuu galaa caymiska. Kasoo qaad hadii aad dhaqtarka aado, caymiskaada ayaa dhiibaayo qarashka intiisa badan. Haddii ay shaqada kaa dhamaatay, waxaad heli kartaa muddo cayiman ceeydh. Haddii sidoo kale aad xanuunsato aadna dibdambe u shaqeenkari weydo waxaad heli kartaa ceeydh.

Waxbarashada fiican waa muhiim se aad mardambe shaqo fiican u hesha. Nederland waxbarashada aad ayaan u ticgalinaa ilaa iyo aan waajib ugu yeelnay carruurta shan illaa iyo lix iyo toban sano, waxaa qasab waajib ku ah inay tagaan dugsiyadooda. Sidaas daraaddeed waxay isku diyaannayaan bulshada iyo suuqa shaqada. Dhalinyara da'da yar ee aan weli haystnin shahaado, waa inay raacdaan cilmiga ilaamay siddeed iyo toban ka gaaraan.

Bulshada reer Holland

Ninwalbo wuxuu ka qeeyb qaati bulshada oo ka dhiiba lacag. Tusaale ahaan canshuuraha. Qof kasta waa in ay bixisaa canshuurta. Dadka sameeyo lacag ka badan kuwa kale. Ay sidoo kale canshuur badan yihiin kuwa kale. Lacagta canshuurta dawladda waxay u isticmaalaan waxwalbo oo muhim u ah qof kasta. Ka feker tusaale ahaaa wadooyinka, waxbarashada iyo boliiska.

Waxaa dagan dalkeena dad noloshoodu kala duwan iyo jinsiyado kala duwan. Waqtiga shaqadaada ku jirto, dukaanada ku jirto , ama iskoolka ku jirto. Waxaad

meelwalbo ku arkeysaa dad kala dhaqan duwan. Waxaa marka aad u muhiiim ah inaad kuwa kale aad u tixgalisaa kala duwanaanshahood.
Bulshada Hollandeeska waa mi daad u furan. Taas oo macnaheedu tahay in dadku si xor ah u sheegto waa ay u maleeyaan waxaa sidoo kale ka dhigan tahay in dadka kale, haddii ay aadan kula raaacsaneyn ra'yi, in la yidhaahdo waxa laga yaabaa. Isweydaarsiga fikradaha ama isweydaarsiga fikradaha waa muhiim sababto ah dadku marka dadku sidan ayay sidan isu noqon karaan. Qofna qasab kuma ahi dalkeena inan nolosh ku noolaadaan sida ay u aaminsan yihiin dadka qaarkood.

Nederland, dadka oo dhan waxaa laga filayaa inay ka qaybgalaan bulshada. Sidaas bulshada nederlandka waxay kaa filaysaa in aad ka qeeq qaadato bulshada. Waxaad baran

luqada hollandeeska, shaqo raadinta ama shaqo tabaruc ah (oo la kulmaan dadka). Nederland dantaada waxay u qalanta sida kan kale dantiis. Buug-yarahan waa mid kuu cadeeyay waxa waajibaadka iyo xuquuqda aad leedahay ee bulshada y sets out your rights and obligations within society.

Xoriyadda

Xoriyadda macnaheedu waxaa laga yaabaa in aad u malaynayso in aad dhihi kartid ama suubin kartid wax aad rabto. Qof walba Nederland waxay leeyihiin isku xorriyad. Taas macnaheedu waxa weeye in ay dadka kale ku fikiri karaan inay dhahaan ana suubiyaan waxay doonayaan. Qoraalkan hoos ku yaal ayay ku dhex qoran yihiin xorriyaad-ka ugu muhiimsan.

Diinta

INederland gudeheed waxaad dooran kartaa diinta aad rabto. Dadyowga kala diimaha kala duwan leh waxay ku noolaan karaan si ammaan ah dalkeenna. Qofna yey dareemin in la hanjabay ama halis ku jira diintiisa awgeed. Xorriyadda ah inaad rumaysantahay waxa aad rabto, waxa ay sidoo kale ka dhigan tahay in laguu oggol yahay inaad dooratid diin la'aan. Waqti walbo ayaad go'aansan kartaa arintaas iyadoon cidna wax ka oran karin. Xorriyadda tani, waa in aad sidoo kale u ogalaataa dadyowga kale: uma baahna in ku qasabto qofwalba waxa aad aaminsantahay aaminto. Oo haddii qof go'aansado inay diinta ka baxdo aad sidiisa ku ixtiraamtaa. Xitaa haddii aadan kula raacsaneyn. Qof kasta waa uu muujinkaraa diinta uu heysto/ heysato dadka kale. Tusaale ahaan, asagoo xirta silsilad calaamad diin ah wadato, xijaabka madaxa ama koofiyad / cimaamad ama dharka kale. Hadii ay diintaada kaa reebtay cuntada qaarkood, cidina kuguma qasbi karto inaad cunto. Waxaad dadka ku yeeri kartaa dukashada salaada iyo waxaad bilaabi kartaa diin cusub.

Cirfadaha qaarkood, waxaa si dhab ah muhiim ah in qof kasta isku dhar xirato. Tusaale ahaan, ciidanka, booliska ama maxkamadda saraakiisha booliska ayaan loo ogolayn inay xirato siiba naaguhu macatab (calaamada istilaabka) inta ay shaqadaas hayso sababtoo ah waa in laga dareemin meesha ay raacsantahay ayna u ekaataa dhexdhexaadnimo. Diinta alle diinta aad aaminsantahayba, waa in aad had iyo jeer ku dhaqantaa sharciga.

Fikirkaada

Nederland waxaa ku nool dad farabadan oo kala duwa, kana soo jeeda dhaqammo kala duwan. Qof walba waxa uu xaq u leeyahay isaga ama iyada fikir u gaar ah. Nederland waxaad ku fikirikartaa, dhihi kartaa ama qori kartaa waxaad rabto. Waxaad u diri kartaa wargeyska ama dowlada adigoo ka banaanbaxaya ama kala doodeeysid iyo adiga oo fikirkaada soo shaacbixinaysid. Dabcan waxaa muhiim ah in lagu xisaabtamaa dadka kale.

Nederland waxay leedahay dhowr telefishanno, wargaysyo iyo jaraaidyo. Dowladda waxba kama orankarto waxa ay warbaahinta qorto ama sheegto.

Had iyo jeer waad ka hadli kartaa wixii aadan ku raacsaneyn. Qofna kuuma diidi karto rayigaaga. Xorriyaddan aad ayaan muhiim ugu aragna wadanka gudihiis, sababtoo ah waxaad qaadan kartaa go'aan fiican gaari kartaa markii aad dimuqraadi ahaan cidwalbo rayigiis maqashay.

Fikraddaad heysataba, waai naad dhowrtaa sharciga. Taas macnaheedu waxa weeye in aad cidkale si ula kac ah u aflagaadeeynin, aadan dhaawicin ama aadan ugu wicin neceeb iyo cadaawad. Tana ma ahan arin fudud in la isku afgarto halka ay xuduudaha xoriyadda hadalka ku ektahay. Taas aad ayaa looga hadley Nederland ugu dambeeytii garsooraha ayaa go'aan ka gaaraya arintaas.

Sidaa darteed, waxaad odhan kartaa sidaad u arakto. Iyo maadaama cidwalbo isku si ula dhaqanno, waxa uu isagu ama iyadu jecel yahay dhihi karaa. Waxaa dhici karta in qof uu leeyahay ma dhahaa wax aadan kula raacsaneyn, taasoo aad kuu gubi karta. Sidaa darteed xoriyaddu hadalka laba dhinac ayey leedahay. Haddii qof walba rayigeed loo daayo, waxaa mararka qaarkood la xumeeyay qof. Laakiin xoriiy-adda hadalka micnaheedu ma aha inaad iska dhahdo wixii aad rabto.

Haddii aad dareento in lagu caayay ama lagu takooray, waxaad gudbinkarta ama u bandhigi kartaa dacwad wakaaladda lidka-takoorida ah. Garsooraha ayaa markaas go'aan ka gaari doono haddii ay tahay dambi waxa uu qofkaas yiri. Hadalka qaarkiis waa mid xaqiiqdii la mam-nuucay. Tusaale ahaan, cidna uguma yeeri kartid inay cidkale wax yeello gaarsiiso ama tiraahdo waxyaabo keeni kara rabshad dagaal.

Qaabka nolosha

Dadka waxay Nederland gudaheed muujinkaraan diintooda iyo waxay dooran karaan qaab nololeed u gaar ah. Taas macnaheedu waa inaad dhegeysankarto music kasto oo aad doonto, dharkaad aad xirato, nooca shaqada ee aad ka shaqeyso, wargeyska aad aqrisato iyo waxa aad cunto. Iyo waxaad rabtid ogow.

Tani xitaa waxa ay leedahay xadidaad. Sarkaal bilays ah waa inuu u ekaadaa dhexdhexaad. Iyo shirkadaha qaarkood waxa ay leeyihiin ceerar ku saabsan shabada jirka (tattoos) iyo duritaanka jirka (faruurta, sanka, xudunta iyo wixii lamidka ah). Tusaale ahaan, waxay doonayaan shirkaduhu in shaqaaluhu aysan leeheen tattuajo ama xirneen biro jirkooda ka muuqda. Amaankooda dartiis, ama aysan u arag wax aanan ku haboonayn. Dadka kale kuuma go'aaminkaraan qaabka noloshaada. Waxaa kaloo dhici kara in derriskaada qaab nololeed kale leeyahay ama deenkale oo ka duwan taada leyahay, dhar kale xirto ama musik kale dhegeeysto. Kaliya hadii aan aqbalno inay jiraan dad badan oo naga duwan inay jiraan iyo inaan is tixgalino ayaan si fiican iskula noolaan karnaa Nederland.

Freedom of expression?

Wariya ayaa ku qortay maqaal wargeyska halkaas oo ay ku dhaleeceeysay xorriyad xadidan ee hadal wadan kale. Dhoor ka mid ah dhalinyarada wadankan degan , ayaa dareemay in la bahdilay artikelkan dartiis. Waxay saxafiga u direen qadka internetka sida Twitterka fariimo cay iyo hanjabaad ah. Waxayna heshay in ka badan kun posto taas oo ay sheegtay in cadgudbo iyo dhimasho loo rajeynaye. Saxafiyada ayaa dacweysay qolada u hanjabaaday.

Qof kastaa wuxuu leeyahay xorriyadda hadalka, laakiin ma aad oran kartid wax kasta. Tusaale ahaan inaadan cidna xumaanta keenta naceybka ku haynin ama rabshad ama caaytin dadkale.

Tusaale kale: dhowr sano ka hor, xukummo ixtiraamo booliska cartoonist ah. Boqolaal dad ah ayaa u keentay kiis ninkan. Oo wuxuu kaloo sameeyey sawiro ku saabsan Rasuulka Muhammad (S.C.W.), wuxuuna galiyay internetka. Muslimiin badan ayaa u arkay caay. Waa la xiray waayo wuxuu internetka galiyo sawirgacmeed oo qaabka tv-ga kartoonka loo sawiro kaasoo uu ku cunsuriyeeynaye oo uu ku xumeynaye muslimiinta iyo dadka jirkooda madoow. Sawirahaas oo ahaa mid u raacsan si buuxda xornimadda iyo fikradaha hadalka. Wuxuu u isticmaalaye sawiradiisan inuu fikirkiisa uu islaamka ka qabo ku muujiyo.

Kartooniiste uma baahna inuu weydiisto ogolaansho si uu sawiradiisa internetka ama wargeysyada geliyaa. Dib dambe ayaa qaaliga xukmindoono inuu cartoonistaha aad ugu daray. Xaaladdan oo kale, maxkamadda maysan xukmin.

Ururka

IWaxaa muhiim ah in aad dareento Nederland sidii gurigaaga oo kale, aad dadka kale barataa iyo bulshada ka qeyb gaadataa. Tusaale, waxaad ku biiri kartaa naadi, tag magaalada ama waxbarasho ama koorso gal. Sidan ayaad ku barankarta dad kale oo jecel waa adi aad jeceshahay. Waxaad furan kartaa urur Nederland gudihiisa ah. Tusaale ahaan, urur isboorti ah, laakiin sidoo kale urur shaqaale ama xisbi siyaasadeed ama urur loogu talagalay dadka dalkaagii ka yimid. Iyada oo urur sida urur shaqaala ama xisbi siyaasadeed. Rayigaaga ayaad maqashiin kartaa. Sidaas darteed ayay ku fiicantahay dal dimuquraadi si ay dadka u bilaabaan urur. Wada shaqeenta ururka ma ahan mid ku fiican wada kulanka oo kaliy laakiin tusaale ahaan waxaad saameeyn ku yeelankarta siyaasada.

Dabcan, waa in qof walba oo ka tirsan uruka dhowraa sharciga. Haddii dad ka tirsan ururka aysan dhowrin sharciga, maxkamadda waxay mamnuuci kartaa ururka gabi ahaan. Waxaa tusaale ahaan reebban in la isticmaalo ama lasuubiyo rabshado.

Waxaa kale oo la ogolyahay in aad Nederland gudeheed jidka dadbadan isugu yimaadaan si ay u shiraan amaba u banaan baxaan. Banaanbaxa waa noo ka mid ah dibad bixid lagu muujinayo rayigaada oo aad shaaca ka qaadid.

Hadii aad rabto banaanbax, waa in aad marka hore u sheegtaa gemeentida. Maamulka degmada ma mamnuuci karto banaanbaxa iyadoo ku diidaysa mowduuca lagu banaanbaxayo. Bananbaxa waxaa kaliya la ogolyahay kaliya haddi aad dadka kale qasaare ama dhibaato gaarsiineynin, haddii aadan dhibaato gaadiidka ama caafimaadka dadka gaarsiineynin. Haddii dibad baxa yaashu aysan sharciga dhowrin, booliska ayaa soo dhaxgaloayo, gemeentida ayaana go'aansanaysa inay joojiso bananbaxani.

Go'aansasho

Nederland adiga ayaa go'aansankartid nooca doorashada noloshaada waxaad ku sameen laheyd. Tan waxaa loo yaqaannaa xaqa go'aanka nafsadaada. Sidaas waxaad ku doorankarta inaad ama inaadan diin yeelatid. Waxaad dooran kartaa hab nololeed kuu gaar ah. Waxa kale oo aad go'aan ku gaari kartaa inaad guursato qofkaad rabto si aad u hesho natiijo jinsigaaga ah. Xaqa go'aanka nafsadaada waxay ka koobantahay xorriyad badan taas oo muwaadiniinta oo dhan xaq u leeyihiin.

Go'aansashada naftaada waxay sidoo kale ka dhigan tahay in aad naftaada ogaatid waxa aad jirkaada ku suubin lahayd. Cidna kuma dhaawici karto ma ku taaban karto hadii aad adiga doonayn. Xataa dhakhtar wuxuu kaliya ku baari karaa markii aad adiga raali ka tahay.

Xeerkan marka laga reebo sharciga. Boliiska wuxuu kaa baari karaa tusaale ahaan shuruudaha qaarkood in aadan wax hub ah sidanin. Booliisku waxay samayn karaan baritaan lagu hubinayo in darawaladda aysan cabin gamri ama alcolo.

Waxa kaloo jira dorashooyin muhiim ah aa aad ka gaari kartid tan ku saabsan jirkaaga. Sidaas ayay dumarka waxay xaq u leeyihiin in ay uurqaadin. Sidoo kale in aad codsato in nafta lagaa qaado daruufo gaar ah dartood ee wadankan gudihiis. Sida qof haya cudur oo aan daawo lahay ama wax rajo iyo horumar lahayn, markaa ayuu dhaqtarka ka codsankaraa in naftiisa la gooyo.

Inkasta oo ay Nederland ogoshahay in nafta lagaa qaado ama ilmaha la iska soo rido, weli murun ayaa ka taagan mowduucan. Xisbiyada siyaasadeed waxay leeyihiin fikrada kala duwan oo ku saabsan arintan.

Sinnaanta

Dadka oo dhan waa ay siman yihiin. Isla sinnaanta micnaheedu ma ahan in dadkoo dhan isku mid noqdaan, sababtoo ah qof kasta waa ka duwan yahay kan kale. Laakiin dadka oo dhan, lakin dadka waa isku qiimo. Qof kastana waa in loola dhaqmo si isku mid ah.

Uladhaqmid simman

Nederland waxaa loola dhaqmaa dadka isku marxalada ah si siman. Tani waa xaq uu leeyahay ee uladhaqmidda loo simmanyahay. Haddii aad tahay lab ama dhaddig, khaniis ama sida caadiga, dhalinyaro ama duq, ama ku dhaltay Holland ama wadan kale. Sinaanta waxay sidoo kale ka dhigan tahay in xeerarka cid walbo khuseeso. Ma jiraan sharciyo u gaar ah Masiixiyiinta kaliya, muslimiinta ama remaystayaasha kale, iyo jirin ceerar u gaar ah dumarka ama raga ama khaniisiinta. Dabcan, sinnaanta ayaasuuragal ah keliya haddii shurrdaha ay isku mid yihiin, ama ah kuwo aad isugu ek.
Shaqo bixiyeyaasha, uma diidi karaan dumarka shaqo ama sikale

ula dhaqmaa madama ay uur leeyihiin ama ay leeyihiin caruur yar yar. Ama la siiyaa naag ahaan lacag ka yar rag inta uu ku shaqeeyo. Waxaa sidoo kale tusaale ahaan dukaamaha waaweeyn loo ogoleyn inay shaqada ka eryaan madaama ay duqnimo soo yara taabatahy.

Wax macno ah ma laha qowmiyada aad tahay. Meesha uu qof ka yimid. Dadka waxay leeyhihiin isku in isla mid loola dhaqmaa. Taas macnaheedu waxa weeye inaad isku xaqtihiin sida qof inta ku dhashay dhinaca shaqada.

Waxaa kaloo muhiim ah in dadka qaba ama xagga jirka ama maskaxda dhiman inay iyagana kasoo qeybqaadan karaan bulshada. Sidaas darteed waa in ay iyagu leeyihiin fursado shaqo la mid ah sida dadka kale. Qofna looma diidi karo shaqo taasoo ku haboon isaga, kaliya in sabab looga dhigo isagu ama iyadu inay leedahay naafo. Mararka qaarkood waa in ay shirkadu suubisaa goob u gaarah oo loogu talagalay shaqada.

Mamnuucidda takoorka

IFicil ahaan waxaad nasiib darro la kulmi kartaa ereyo takoor ah. Waxaa dhacaa in loo shaqeeyayaasha door bidaan qofka shaqaale oo reer Holland ah markii loo eego qof Polaan ah ama Surinaam.ama in ragga loo diido inay galaan meelaha cawayska habeenkii inay soo galaan madaama ay wadankale u dhashteen. Tani waa mid aan la aqbali karin.

Lab iyo khaniisba waa in loola dhaqma si isku mid ah. Khaniisyada waxay xaq u leeyihiin inay noloshood u doortaan qaaq nololeed u gaar ah. Iyo inay hay'ad u gaar ah lahaadaan. Holland waala ogolyahay dadka isku jinsiga ah inay is guursadaan. Nederland waa wadanka kaliya ee ugu horeeyey dunida oo ixtiraafo arinkan.
Hadaba, takoorka Nederland guduhiis marna lama aqbalaayo. Diintaada malagugu takoori karo, asalkaada ama qaab nololeedkaaga. Mana aad takoori kartid sidoo kale dadka kale caqiidadooda, asal ahaan ama qaab nololeed.

ma dareensantahay in lagu takooray shaqadaada, markii aad kasoo baxdo ama meel kale? Fadlan waxaad u sheegtaa hay'adda ka-hortagga takooridda ah, booliska ama

kulliyadda u dooda xuquuqda aadanaha.

- Anti Discriminatie Bureau. Kijk op www.discriminatie.nl
- Ga naar: www.rijksoverheid.nl/onderwerpen/discriminatie/aangifte-doen-van-discriminatie
- www.mensenrechten.nl

Midnimadda iyo shaqada

waa maxay macnaha midnimada? Midnimada waxay ka dhigan tahay in aynu is tixgalinaa, oo aan ogaano in dadka kalena anagan sidaas noot ix galiyaan.

Is caawinta

Nederland waa mid ka midka ah dalalka ugu qanisan adduunka. Dadku waxay helaan xurriyado farabadan iyo fursado si ay wax noloshooda ugu qabsadaan. Dabcan waa ay jiraan dalkeena gudihiis dhibaatooyin kuwaasoo xal u baahan. Laakiin waxyaalo badan ayaa ah kuwo si fiican loo abaabulay.

Nederland qofwalba waxay ka bixisaa canshuur. Dalka daqliga badan soo gala waxay dhiibaan canshuur ka badan dadka daqliga yar. Iyada oo lacagta cashuurta dawladda dugsiyada, jidadka iyo booliska wadooyinka ku bixisaa. Laakiin dawladda ma daryeeli karto wax walba. Sidaas awgeed waa muhiim in dadka iyaka is caawiyaan.

Dad badan ayaa Nederland ka shaqeeya shaqada iskaa wax u qabsaha ah. Tusaale ahaan, kooxda isboortiga, in guri daryeel waayeel, ama dugsiga. Daka kale ee daryeesho qof guriga joogto.

Hab-nololeedka

Waa in aad adiga hubiso in aad shaqeysatid lacag kugu filan oo aad ku noolaato. Barashada afka holandeeska hadal ahaan iyo qoraal ahaanba ayaa kaa caawn karta. Haddii aadan aqoon fiican u lahayn luuqada, waad baran kartaa. Haddii ay kugu adkaato in aad shaqo hesho, waxa aad gargaar weydiisankarta qoyskaagda, saaxiibada ama ruru ka heli kartaa.

Kaliya haddii ay dhab ahaantii kuu hirgali waydo inaad lacag soo shaqeysato. Sowladda ayaa kaa caawin doonta. Tusaale ahaan haddii aad xanuunsato oo aad dib dambe u shaqeenkarin, ama haddii lagaa soo ruqseeyay shaqadada oo aad heysan lacag aad isaga bixiso ijaarka ama cunto ku iibsato. Haddii ay taasi dhacdo, waxaad heli kartaa shurudaha qaarkood lacag ijaarka kaa kabta iyo ceer iyo kab dhinaca caafimaadka dowlada ayaa kaa kabaysa. Si aad u bixiso kirada guriga, cunto ku iibsataa, kharashyada caafiaadka iyo xisaabaha ku dhiibto biilasha kale.

Shaqo

Haddii aad shaqayso, waxaad xaq u leedahay mushaarka ugu yar. Inta ay la egtahay taas, waxaad ka heli kartaa http://www.rijksoverheid.nl/ onderwerpen/minimumloon/vraag-en-antwoord/hoe- hoog-is-het-minimumloon.html. Cidda shaqada kusiisay waa in aanay bixinin wax ka yar mushaharka ugu yare e sharci ahaan loogu talagalay. Intaa waxaa dheer, waxaad xaq u leedahay in ay wati iyo maalmaha fasaxa lacag la'aan ah. Waxa kale oo jira xeerar ku saabsan tirade saacadaha aad ka shaqeyn karto maalin kasta iyo inta jeer ee waa in aad nasato. Haddii shaqabixiyahaaga uusan dhowrin xeerkan, waxaad ku biiri kartaa urur shaqaale aad u caawin kara arrintan.

Mushaharka ugu yar

Waxaad u shaqayn lix maalmood isbuucii laga bilaabo sideedii subaxnimo subaxdii ilaa shanta habeennimo aad u shaqeyso tababaraha kooxda. Dhammaadkii toddobaadka kasta oo aad ka heli doontaa €100,-. Waxaad ka shakisay tahay in ay tani tahay wax aad u yar. Waxna kama orankartid, sababtoo ah wuxuu heli kara dad kale oo intaas ugu shaqeen karo lacagtani. Maxaad samaynaysaa?

Waxaa jira mushaarka ugu yar ee Nederland. Wixii isbuucii ugu badnaan ka shaqeeya 40 saac waa in aad ka heshu (2014) ugu yaraan €342,85 isbuucii. Tani waa qadar guud, kuwaas oo aad u baahan tahay inaad bixiso canshuuraha.

Waxaa weli jaraan shaqo-bixiyeyaal kuwaasoo shaqaalohood siiya mushaharka yar oo kasii yar mushaharka ugu yar. Waa in aad qaado talaabo haddii aad hesho in ka yar mushaharka ugu yar laftiisa. Haddii kan aad u shaqayso ku diido inuu ku maqlo, waxaad war gelisaa hay'ada kormeeridda arrimaha bulshada ama lowyar u qabsataa.

Qoraalkan waa soo daabacadday:

Wasaaradda Arrimaha Bulshada iyo Shaqada

iyo waxa la soo saartay:

Pro Demos, House of Democracy and Constitution

Photography : www.mieke-ann.nl (pagina, 3, 4, 8, 9 en 10)

Februari 2014 | Publicatienr. 573-623800 | SOMALISCH